
# Dhallaanka Cusub

## Sidee ayay u shaqeysaa?

**Dhallaankaagu wuu dhashay!**



24-48 saac dhalashada kadib

**3 baaritaan ayaa la sameeyaa si loo hubiyo caafimaadka dhallaankaaga:**

- Baaritaanka maqalka
- Baaritaanka wadnaha
- Baaritaanka muunadda dhiigga

**Baaritaanka maqalka** iyo **baaritaanka wadnaha** ayaa qaata dhowr daqiiqadood. Codso natiijada dhallaankaaga marka baaritaannada la sameeyo.




**Baarista muunadda dhiigga** waxay qaadataa dhowr maalmood. Baarista muunadda dhiigga ee la qallajiyay ee dhallaankaaga ayaa loo diraa shaybaarka Waaxda Caafimaadka ee Minnesota si loo baaro.

Shaybaadhka, muunadaha dhiigga ayaa loo kala qaybiyaa goobooyin yaryar si loogu sameeyo baaritaano mid kasta oo ka mid ah. Dhallaankaaga ayaa laga **baaraa in ka badan 60 xaalad oo caafimaad.**

**Natiijooyinka Taban:** Haddii wax walba noqdaan caadi, natiijooyinka waxaa loo dirayaa dhakhtarka dhallaankaaga. Codso natiijada dhallaankaaga marka aad samayso booqasha koowaad ee dhallaankaaga cusub.

**Natiijooyinka Togan:** Haddii ay dhibaato jirto, shaybaarka ayaa wici doona dhakhtarka dhallaankaaga. Baaritaanku wuxuu kaliya noo sheegi karaa inuu dhallaanka qabo dhibaato caafimaad. Dhab ahaan ma ogaan doonno ilaa uu dhakhtarku sameeyo baaritaano dheeraad ah. Dhakhtarka dhallaankaaga ayaa kaala hadli doona waxa loo baahan yahay in la sameeyo marka xigta.

# Kadib Baaritaanka Dhallaanka Cusub

## Maxaa ku dhacaya muunadaha dhiigga ee soo hara iyo natiijooyinka?

**Waalidiintu way dooran karaan** waxa lagu sameynayo muunadaha dhiigga ee soo hara iyo natiijooyinka.




Muunad kasta way ka yar tahay cabbirka shilin.

### Ikhtiyaarka A: Keydinta

Muunadaha dhiigga ee soo hara iyo natiijooyinka waxaa si ammaan ah loogu keydin doonaa gudaha Waaxda Caafimaadka ee Minnesota.

Tani waa wax **si toos ah u dhaca** haddii aadan dooran **Xulashada B** ama Xulashada C.

### Ikhtiyaarka B: Keydinta + Cilmi-baarista

Waxaad dooran kartaa inaad hesho muunadaha dhiigga ee soo hara ee dhallaankaaga iyo xogta aan la isku aqoonsan karin ee loo isticmaalo cilmi-baarista caafimaadka dadweynaha.

Si aad u doorato xulashadan, waa inaad oggolaansho bixisaa adigoo saxiixaya foomka oggolaanshaha.

### Ikhtiyaarka C: Burburinta ama Soo Celinta

Muunadaha dhiigga ee soo hara iyo xogta waa la burburin karaa kadib marka la bogo baaritaanka ama dib ayaa laguugu soo diri karaa.

Haddii aad dooratid ikhtiyaarkan, muunadaha dhiigga dib dambe lama heli doono si loo baaro haddii adiga ama dhakhtarkaaga aad u baahan tihiin.

Haddii aad doorato **ikhtiyaarka A: Keydinta** ama **Ikhtiyaarka B: Keydinta + Cilmi-baarista**, waad beddeli kartaa fikirkaaga oo waxaanad dooran kartaa xulasho ka duwan waqti kasta. Kaliya la xiriir Waaxda Caafimaadka.





Ka codso dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada, ama umulisadaada foomka aad u baahan tahay ee **Ikhtiyaarka B: Keydinta + Cilmi-baarista** ama **Ikhtiyaarka C: Burburinta ama Soo Celinta**. Foomamka waxaa laga heli karaa barta onlaynka www.health.state.mn.us/newbornscreening.

**Waa mid waxtar leh in lagu keydiyo muunadaha dhiigga ee soo hara iyo natiijooyinka gudaha Waaxda Caafimaadka, si loo:**

**Wanaajiyo Baaritaanka:** Si aan u hubino inaan helno dhammaan dhallaanka laga yaabo inay qabaan mid ka mid ah dhibaatooyinkan caafimaad, waxaan u baahannahay inaan hubino in baaritaanadeena iyo qalabkeena ay u shaqeynayaan sidii la rabay. Habkan waxa loo yaqaanaa ilaalinta ama hubinta tayada.

**Baahiyaha Qoyska:** Qoysaska qaarkood ayaa goor dambe codsado si baaritaan loogu sameeyo haddii ilmahoodu jirrado. Baaritaanka muunadaha dhiigga ayaa gacan ka geysan karta inaad tilmaamo ka hesho bal in wax jiray xilliga dhalashada inay ka dhigtay ilmuhu inuu xanuunsado.

**Samaynta Tijaabo Cusub:** Waan adeegsanaa si ay nooga gacan siiyaan samaynta baaritaanada cusub si loo ogaado loona daaweeyo dhallaanka qaba dhibaatooyinka kale ee caafimaad goor hore. Muunadaha dhiigga oo dhan ee loo isticmaalo in lagu sameeyo baaritaanada cusub ayaa laga saaraa macluumaadka la isku aqoonsan karo, oo ay kamid yihiin magaca ilmaha, taariikhda dhalashada, ama macluumaad kasta oo kale oo la isku aqoonsan karo la lama xiriiriyo muunadaha dhiigga.



## Ma rabtaa inaad wax

Na soo wac: 1-800-664-7772

Noo soo dir iimayl: health.newbornscreening@state.mn.us

Na soo booqo: www.health.state.mn.us/newbornscreening

Nagu xirnow:

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaaqaab kale, wac (800) 664-7772*

Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay


DEPARTMENT OF HEALTH

**Public Health Laboratory, Newborn Screening**
**(Shaybaadhka Caafimaadka Dadweynaha, Baaritaanka Dhallaanka Cusub)**
**P.O. Box 64899, St. Paul, MN 55164**
**Telefoonka (800) 664-7772 • Fakiska (651) 215-6285**
**www.health.state.mn.us/newbornscreening • health.newbornscreening@state.mn.us**



ID# 54358 • REV 10/2022